# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:02 AM HANSARD No.27/01 Kal-fadhiga 27aad**

**Fadhigii2aad *15/March/2015***

## Dooda Ajendaha Kal-fadhiga 27aad oo socotey hal maalin kana qeyb-qaateen 15 Mudane.

1. **Md. Aadan X. Diiriye Dirir:-**Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Saxaafada ASC, intaan AJendaha u galin waxaan odhan lahaa ha la saxo ajendaha qodobkiisa afraad ee ah xeerka Golaha Wakiilada, malaha waxaa loola jeedaa Xeerka Doorasha Golaha Wakiilada JSL, markaa halkaa sixid ha lagu sameeyo.

   **Hadii aan u soo noqdo sidaan u kala horeysiin lahaa ajendaha:-**

   - **Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka** oo mudo Golaha horyaaley ha laga dhigo qodobka kowaad ee ajendaha.
   - **Xeerka Waxbarasha Qaranka**
   - **Xeerka la dagaalanka Argagaxisada**
   - **Xeerka Doorashooyinka Golaha Wakiilada**
   - **Xeerka Nidaamka Xukuumada**
   - **In saxid lagu sameeyo Xeerkii Diiwaangalinta** Muwaadinimada oo aan maalin dhoweyd ansixinay oo aan leeyahay ha la soo celiyo, moshina waa lagu keenayaa.

   **Waxaan ka saari lahaa Ajendaha:-**

   - **Xeerka Duulista Hawada,** waayo hawadiiba waa la inagu haystaa, markaa markey inoo xalaalowdo ayaynu sharciyaysan laakiin iminka meel ay raacsan taheyba ma hayno.

2. **Md. Axmed Maxamed Diiriye (Nacnac):-** Shirgudoonka Sharafta leh, Mudanayaasha iyo Dadweynuhaba ASC, Salaan Ka bacdi anigu waxaan leeyahay Ajendaha u kala horeysiinayaa sidan:-

   - **Xeerka Ganacsiga Baananka** oo mudo ina horyaaley
   - **Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada**
   - **Xeerka Duulista iyo Hawada** oo loo baahan yahay in Xeer loo sameeyo Hawada.

- Xeer-Hoosaadka Golaha Wakiilada Ayaan ku xejinayaa.
- **Xeerka Caasimada**
- **Xeerka Waxbarashada.**

3. **Md. Axmed Barkhad Obsiiye:-** Ajendaha kal-fadhiga anigu waxaan ugu horeysiin laha:-

    - **Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada,** waayo waxaad moodaa inaanu Goluhuba Xeer ku socon, waayo waxaa jirta, shaley laba Xildhibaan oo cusub baa Golaha ku soo biirey, Xildhibaan wuxuu ku yimi is-casilaad, Istiqaaladana waxaa weeye in marka hore Goluhu ka aqbalo oo loo codeeyo, loomana Codeyn waana dastuuri Qodobkaasi, markaa Sharci jabin baa ku jirta halkaa oo dariiqii saxda ahaa lama marin, markaa Xeer-hoosaadka Golaha waa loogu horeysiiyo oo la adkeeyo.

    - **Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka,** Xeerkaasi waa xeer muhiima oo la inooga baahan yahay, waa Xeer loogu baahan yahay dadka dalka maal-gashanaya.

    - **Xeerka Duulista Hawada** Ayaan ka dhigayaa kan saddexaad.

4. **Md. Xamze Maxamed Gaadaweyne:-** Aniga laba qodob baan ka hadlaya:-

    - **Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada,** waa in kan kowaad laga dhigo, waayo waynu u baahanahey in Xeer-hoosaadku deg-deg u hirgalo oo waxaa inaga jira Qodobo badan oo hawlaha Shaqo inoo fududeynaya.

    - **Xeerka Caasimada,** Xeerka Caasimada waxaad moodaa in muhiimad u yahay shakhsiyaad Golaha ah oo aan Xiisahaa lala qabin, xaq bayna u leeyihiin, Xeerkaasina wuu dawakhay oo mar xaga hoosaa la geynayaa marna xaga sare, waxaad moodaa in Xeerkaasi u baahan yahay in si uun loo galo oo laga doodo, waayo maaha in Ajendaha uun ku dhex jiro, fikrad xun bayna ka dhiibeysa Golaha.

5. **Md. C/raxmaan Yuusuf Cartan:-** Shir-gudoonka iyo Goleweynahaha Sharfta leh, Anigu kala mudnaanta ajendaha afartan Xeer baan ka dhigi lahaa muhiimada kowaad inta kale xaga dambe ha maraane, waxaana u kala horeysiinayaa sidan:-

    - **Xeerka Ganacsiga Hawlaba Baananka** laga dhigo Xeerka kowaad.
    - **Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada** lagu xejiyo

- **Xeerka Doorashooyinka Golaha Wakiilada JSL**
- **Xeerka Waxbarashada.**

6. **Md. Xaamud Cismaan Cigaal:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Xogheynta iyo Martida Waxaan idinku salaamayaa Salaanta islaamka ASC, Gudoomiye Anigu waxaan ugu horeysiinayaa:-

   - **Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada,** waxaan ka dhigayaa kan ugu horeeya.
   - **Xeerka Waxbarashada Qaranka,** kan labaad Ayaan ka dhigayaa oo in badan yiilay.

   **Waxaan ka saarayaa ama dib ha loo dhigo:-**

   - **Xeerka La-dagaalanka Argagaxisada** oo aan loo baahneyn waayo waxaan leenahay Criminal Law oo qofkii dambiga gala lagu ciqaabayo, waxay u egtahey inaynu booliis u noqon wadamo kale oo shisheeya ah taana dhibaatadeeda ma qaadi karo.

   - **Xeerka Duulista Hawada** Waxaan ku raacsanahey Xildhibaan Aadan oo Hawadiiba waa la inagu haystaa, bal markey gees u dhacdo aynu keeno isaga.

   - **Xeerka Nidaamka Xukuumada** aad buu faro badan yahay isna waa in xaga dambe la dhigaa waayo wuxuu u baahan yahay.

   - **Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka,** Xeerkaasi technically inoo soo galo meesha maaha, sababta ah Gudi baa loo saarey shan xubnood ah Warbixin mey soo celin, waxay u egtahey dadka qaarkood doonayaan in back door ahaado, ha soo celiso gudida loo saarey oo markaa Goluhu wuxuu ka yeelayo ha ka yeelo.

   - **Xeerka Caasimada** isagana waxaan maqley waxyaabo badan oo ka mid tahey inaan wadanka Xuduudiisii la sameyn Goboladii iyo degmooyinkii, markaa isna waxay ila tahey in dib loo yar dhigo.

7. **Md. Maxamed Cumar Jiir:-** ASC,wax badan anigu ma kala bad-badaleen, waxaan soo jeedinayaa waxay daruuri ila tahey inaynu ajendaha ku darno hadii cod uu helo, inaga waxaa inoogu muhiimsan waa nabadgalyada, mar

hadey tahey waxa kowaad ee aynu ilaashaneyno nabadgalyada, waxaan ugu horeysiin lahaa:-

- **Xeerka La Dagaalanka Argagaxisada** waa inuu qodobka kowaad noqotaa.
- **Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada,** si aan inaga la inoo eersan oo loo odhan iyagaa doorashada dib u dhigaya Xeerkaa aynu ka dhigno kan labaad.
- **Xeerka Waxbarashada** waayo waa wax umada oo dhan saameynaya inkastoo ayna khatar aheyn hadana waa inaynu sharci u sameynaa.
- **Xeerka Nidaamka Xukuumada** oo wax kale dib uguma dhigine waxaan dib ugu dhigay maadaama aanu aheyn daruuri iminka taagan oo uu yahey wax iska socda**.**
- **Xeerka Ganacsiga Hawlaha Bangiyada** waa xeer daruuri oo mid saameyn leh, markaa isaguna waa inaanu ajendahan inala dhaafin.

Waxaan Ajendaha ku soo kordhinayaa oo ah daruuri in lagu soo daraa waa:-

- **Qabyaalada:-** waxyaabaha aynu ilaashano waxaa ugu mihiimsan Nabadgalyada, nabadgalyadiina waxyaabo badan baa kala tuuraya, mar kaliyana ma koobi karno, laakiin waxaan isleeyahay inaynu talaabooyin qaadno aynu wax kaga qabaneyno waxyaabaha nabadgalyadeena wax yeelaya oo khatarta ku ah oo Gole ahaan ansixino, waxa saxaafadeena had iyo jeer ka baxaya reer hebel hadaanu nahey, markaa aynu qaadno talaabooyinka aynu wax ka qaban kareyno qabyaalada oo ah wax khatar inagu ah, markaa waxaan idin odhan lahaa igu raaca oo aynu ku soo darno ajendaha Qabyaalada waxaynu ku yareyno khatarteeda.

8. **Md. C/kariim Aw Cali Shabeel:-**Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Xogheynta waan salaamayaa, sidii xildhibaanadii hore ka hadleen waxaad moodaa in aan Golaha Xeer-hoosaadkiisu aanu sugneyn, markaa Xeer-hoosadkaa sidii loo dhisi lahaa ee loo qabyo tiri lahaa aynu sameyno. Markaa ajendaha waxaan u kala horeysiin lahaa sidan:-

- **Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada**
- **Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka**
- **Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada**
- **Xeerka Nidaamka Xukuumada.**

9. **Md. Cabdi Maxamed jaamac:-** Dhamaan waxaan idin salaamayaa hadii aan nahay Gudidda Joogtada ah ee Golaha Wakiilada Xeer-hoosaakii wuu naga dhanyahay waxaanan ka dhigi lahaa kan koowaad, waxaan ajendaha ugu soo ka dhigi lahaa :-
   - **Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada**
   - **Xeerka Nidaamka Xukuumada** oo dawlad aan xeer nidaamiye lahani dee waxaba ka soconmaayaan,
   - **Xeerka Duulista Iyo Hawada**
   - **Xeerka Ganacsiga Hawlaha Bangiga** waayo xeerkaasi in badan ayuu ina horyaalay ee xeerkaa aan is dhaafino wanan ka baxay.
10. **Md. Axamed Cabdi Nuur (kijaandhe):-** gudoomiye aad ayaan kuusalaamayaa adiga iyo mudanayaashaba inta aanan u galin ajandaha waxaan ka horaysiin lahaa in yar oo aan ku soo jeediyo Attention kiina kalfadhigii hore waxaan u codaynay Ajande oo aan ku balan qaadnay in aan dhamayno ajandahaa hore hasa ahaatee qayb ka mid ah maynaan samayn hadana qaarkale ayaan hada wadnaa sidaa awgeed waxaan leeyahay dib aan u eegno ajandayaashii hore oo layidhaa maxaa ka qabyo ah maxaase fulay, maxayse u fuli waayeen.

   - **Xeerka Saxaafada:-** Halkaa waxaa ka muuqata in aynaan haysan dariiq aan marno oo ina hagaya sidaa ayaan maalinba meel ugu boodaynaa waayo waxaa ka maqan ajandahan xeerar hore oo ku jiray ajandihii hore oo hadana meesha ka maqan oo uu ka mid ahaa **xeerka saxafada** waxaana soo jeedinayaa in xeerarkaa hore lagu noqdo.
   - **Xeerka Waxbarashada** xeerkaasi oo aad iyo aad ayuu u wanaagsanyahay waayo labaatankaa sano ee aan xildhibaanada ahayn wadankeenu malahan xeer aan ku maamulo waxbarasha sidaa awgeed waxaan leeyaha xeerkaa oo aad u mihiim ah in la sameeyo waxbadana anfacaya tayada ubadkeenana. Waxaa kale oo aan ku dhigi lahaa
   - **Xeer-hoosaadka Golaha wakiilada,** sidoo kale waxaan ku xigsiinlahaa oo aan ka dhigi lahaa
   - **Xeer Nidaamiyada Xukuumada** inta kalana waxaa ila haboon in loo kala horaysiiyo sid ay u kala mihiimsanyihiin, waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in aan dhamayno ajandahaa inoo qoron waanad mahad santihiin.

11. **Md. Ibraahin Axmed Haybe:-** Shir-gudoonka Golaha wakiilada iyo xildhibaanadaba aad ayaan u salaamayaa, waxanan u kala horaysiin lahaa ajndaha sidan:-

- **Xal u helida sixir bararka** ka jira Somaliland maanta waxaa jira dadka aan ka masuulka nahay oo lagactii shililinka iyo doolarka isku badalkoodii uu meel aad u saraysa marayo. Inaga oo dadkeenii uu sidaa yahay maxaan u samaynaa xeer argagixiso, marka hore waa in aan kaa hoos u eegnaa.
- **Xeerka Ganacsiga Hawlaha Bangiyada** oo ajandihii horena ku jiray inaan ka dhigo, xeerka wax ka qaban lahaa sixirbararada dadkeena iyo dalkaba dhibaatada ku haya.
- xeerka nidaamka Xukuumada
- Xeerka Waxbarashada
- Xeerka Caasimaha
- Xeerka Duulista Hawada.

12. **Md. Xassan Cawaale Caynaan:-**shirgudoonka, xildhibaadana iyo dhaamaan wiilasha shaqada adag ahay ee Golaha waad salaamantihiin. Jandahani aad ayuu u wanaagsanyahay kaliya waxyaaba aan ka badali lahaa waxaak mid ah in loogu soo horeysiiyo

- **Xeerka Duulista Hawada**
- **Xeerka Caasimada** waayo waa xeer aad u mihiima oo in badan ina horyaalay,
- **Xeerka Waxarasha** oo aan soo dhamaynay ka Gudi ahaan aanan ku wareejin doono shir-gudoonka.
- **Xeerla Saxaafada**

13. **Md. Maxamed Barkhad Miigane :-**ugu horayn waxaan soo jeediyanaa in shaqaalaha Hadal qoraalka dib loogu noqodo oo gudidda dhaqaaluhu did isugi noqdaan. Marka aan ka hadlayno xildhibaan dhamaan aduunyada oo dhan sadex qodob ayaa muhiim ah oo kuu ka shaqeeyaa mida koobaad waa legislative, oversight oo uu ilaaliyo dawladu waxay samaynaso iyo waxay qabanayso iyo meeshii laga soo doortay oo uu ogaado waxaa uu u baahan yahay iyo dhibaatooyinka haysta, waxaanan halka ku soo darayaa qodon aan halkan ku jirin oo ah in aan ku soo darno marxalada siyaasadeed iyo dhaqaale ee wadanku marayo in uu Goluhu ka doodo weeyaan.

Waxaana haboon in 20sano kadib waxaan samaysanay nabadgalyo iyo wax walba oo dawladi u baahan tahay, markaa waa in aan iswaydiinaa waamaxay sobobtu oo aan ka doodnaa waayo shilinka Somaliland waxaa uu ka hooseeyaa oo maanta dadkii ina soo doortay wax allaale waxay ku noolyihiin kama warhayno.

Nooluhuna horumar ma gaadhi karo hadii aanu cuntadiisu aanay ahayn wax uu isku halayn karo ama nolol maalmeedkiisu markaa waa in aan ku darsano ajandaha oo aan ka warhayno dadkeena iyo dalkaba, takale waxaan ku raacsanahay xildhibaanadii iga horeeyay inta wax ka sheegeen sid xeer – hoosaadka Golaha intaa ayaan soo jeedinayaa Gudoomiye.

14. **Md. Maxamed Cismaan Bulqaas:-** Anigu Ajendahan kal-fadhiga gabigiisaba waan badalayaa waxaan ku soo darayaa Xeerar Cusub oo aynaan hore u arag oo manta kow ah, Xeerarkaasi u baahan inaynu wax ka qabano madaama aynu nahey Golihii Wakiilada Somaliland oo hadey tahey mooshin iyo hadey si kale ku imanayaanba wax laga qabto kuwaas oo ku saabsan Dawladnimada, waxaana yihiin sidan:-

- **Xeerka Cadaalada Wada-lahaansha Qaranka Somaliland**, Ayaan kan kowaad ka dhigayaa, waa loo baahan yahay in dawladnimada saxno, waayo maxaynu wada leenahay mise waynu iska wada joognaa oo beelo gaar ah baa iska heysta.

- **In Dib loogu noqdo 2% Gobolada Bariga** Ayaan isna soo jeedinayaa, lacagtaas oo loogu talo-galey horumarinta Goboladaas oo aan sidey tahey u gaadhin waa in dib looga noqdaa ama qorshe kale loo sameeyaa.

- **Xeerka kala-sareynta Qabyaalada** kaana waxaan jeclahay inaynu ku soo darno ajendaha, waayo way jirtaa oo A,B,C baynu kalana nahaye, waxaynu nahey Golihii Xeer-dejinta dalka waa inay ka hadlaan oo ka muujiyaa dareenkeedo.

- **Xeerka Maamul-gaadhsiinta Gobolada Bariga,** dawlad baynu sheeganeynaa Somaliland la yidhaahdo waxba kama jiraan oo burco ma dhaafsiisna oo wixii xagaa xiga no more Somaliland, markaa sidii maamulka loo gaadhsiin lahaa oo dawladu uga shaqeyn laheyd waa in la sameeyaa.

- **Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada.**

- **Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada iyo**

- **Xeerka Ganacsiga Hawalaha Baananka.**

15. **Md. C/raxman Cismaan Caalin:-** Gudoomiye anigu ajendahan la inoo keenay waxaan u arkaa arbush oo nooc arbush ah, ajendahaasha aynu leenahay waxaa ka mid ah sidey ajendayaashu xidhiidh u yihiin oo kal-fadhigii hore iyo sidey u kala horeeyeen loo soo dhigaa, hadii maalin walba mid nooca la keeno dee adeer ma soconeyso, waxaa ugu dambeeyay ajendihii hore oo ay aheyd inay doodiisu bilaabanto Xeerkan Duulista Hawda oo Gudoomiyuhu balan qaadey markii Golaha loo qeybiyay in marka la soo noqdo la bilaabayo Doodiisa oo mudanayaasha loo sii qeybiyay, maantana wax kalaa qoran.
    - **Xeerka Duulista Hawadu ha soo horeeyo,**
    - **Xeer-hoosaadka iyo Xeerka Caasimada** shanti ajende ee dambeysayba way ku jireen maxaa loo jeedaa waa ciyaar sidani, markaa Xeer-hoosadka iyo Xeerka Caasimadu ha ku xigaan, waxan kale ee la iska soo qorey inaga daaya.
    - **Xeerka Argagixisadu** kan afraad ha ahaado, waxan kale inaga daaya.

**Cawad Cali Maxamed** — **C/risaaq Siciid Ayaanle**

**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** — **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**

------------------------------------------------ ----------------------------------------